



**DOWLADDA HOOSE EE DEGMAA GAROOWE
DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

**WARGELINTA DADWEYNAHA
EE
QORSHA HAWLEEDKA DIB-U-DEJINTA**

MAAJO 26, 2022

Taageerada wejiga labaad ee mashruuca uu maalgeliyo Bangiga Adduunka ee adkaysiga¹ magaalooyinka Soomaaliyeed, Dowladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay qorsheysay in la dhiso shan (5) waddo oo laami ah iyo hal (1) buundo. Waddooyinka iyo buundada la dhisi doono wadarta cabbirkoodu waxa ay dhan tahay 7.6 km, waxayna kala yihiin:

1. Waddada Waaberi – 1.4 kilomitir (aaga Saddex Xiddigood ilaa Kaam Shabeelle);
2. Waddada Injida – 0.7 kilomitir (waxay isku xiraysaa Waddooyinka Islaan Maxamed iyo Shiikh Cabdulqaadir);
3. Waddada 30-ka – 2 kilomitir (dhanka Koonfureed);
4. Waddada Towfiiq – 2.14 kilomitir (wadada hormarta Maqaayada Isbageeti);
5. Waddada hormarta Dugsiga Sare ee Gambool/Jaamacadda Dawladda Puntland (Puntland State University)/Cisbitaalka Guud ee Garoowe – 1.22 kilomitir; iyo
6. Buundo loo maro Cisbitaalka Guud iyo goobaha kale ee waxbarashada – 0.14 kilomitir.

Waqtigan la joogo waxaa socota shaqooyinka dhismaha afar (4) waddo oo ka mid ah kuwa kor ku xusan (1-4). Sidoo kale, waxaa la diyaariyey dhammaan hawlihii horutabinta lahaa ee dhismaha buundada iyo waddada hormarta dugsiga sare ee Gambool ama Jaamacadda PSU.

Iyada oo la tixraacayo shuruucda Dowladda Puntland, kuwa heer qaran iyo halbeegyada la xiriira deegaanka iyo bulshada ee Bangiga Adduunka, gaar ahaan halbeega shanaad (5^{aad}) ee ku aaddan dhul kala noqoshada, xadididda isticmaalka dhulka, iyo barakaca aan khasabka ahayn, waxaa dib-u-eegid lagu sameeyay qorshaha dib-u-dejinta kaas oo qeexaya hawlaha ay dowladdu ka qaban doonto saameynta taban ee uu mashruucu ku yeelanayo dadka iyo hantidooda.

Waxaa qiimeyn balaadhan lagu sameeyey saameynta taban ee mashruuca, waxaana la ogaaday in guud ahaan mashruucu uu saameynayo hal (1) goob ganacsi ah iyo 14 qoys oo ka kooban boqol iyo saddex iyo toban qof (113) kuwaas oo ay ka mid yihiin 67 carruur ah.

¹ Sidii ay ugu adkaysan lahaayeen colaadaha iyo masiibooyinka dabiiciga ah.

Mashruucu waxa uu saameeyey 31 hanti ah kuwaas oo ay ka mid yihiin saddex (3) qol, afar (4) jiko, siddeed (8) deyr guryo, saddex (3) berkadood, hal (1) xero ari, shan (5) sandaqadood, shan (5) musqulood, iyo labo (2) bulaacadood. Dowladda Hoose ee Garoowe ayaa bixinaysa magdhawga hantidan oo dhan ka hor inta aysan bilaaban hawlaha la xiriira dhismaha waddooyinka iyo buundadaba. Caddadka magdhawga ee la siin doono DMS waxa uu dhan yahay Lixdan iyo Saddex Kun Saddex Boqol Sideetan iyo Todobo ee lacagta Doolark ah (US\$63,387).

Dhirta iyo tiirarka korontada ee ka dhex taagan waddooyinka si feejigan baa loo maareyn doonaa. Dhirta waa la ilaalin doonaa, halka tiirarka korontada meelaha ku habboon loo wareejin doono. Qiimeyntii la sameeyey waxaa lagu ogaaday in aysan jirin wax barakac ah ama burburin dakhli ee qoysaska mashruucu saameynta ku yeeshay.

Qorshaha-dib-u-dejintu waxa uu qeexayaa yoolasha iyo waqtiga fulinta mashruuca, shuruudaha ka mid noqoshada dadka mashruucu saameeyey, shuruucda iyo hay'adaha dawlaha ah ee ku lug leh, habka loo maray qiimeynta hantida dadka mashruucu saameeyey, caddadka magdhawga, ka qaybgalka iyo la tashiga bulshada, iyo habka xallinta tabashooyinka la xiriira qorshaha. Dadka loo aqoonsaday in mashruucu saameyn taban ku yeeshay waa dadka hantidooda la qiimeeyey wixii ka horeeyay 10^{kii} Janaayo, 2020 (gaar ahaan shanta waddo) iyo 30^{kii} Abriil, 2021 (buundada loo mari doono Cisbitaalka Guud).

Ugu dambeyn, Dowladda Hoose ee Degmada Garoowe waxaa mar walba ka go'an dhowrida iyo horumarinta deegaanka iyo arrimaha bulshada. Gaar ahaan, mashruucan waxa uu bulshada ku dhaqan Caasimadda u leeyahay muhiimad weyn, waxaana dhowaan bilaaban doona hawlaha dhismaha ee buundada loo mari doono Cisbitaalka weyn iyo waddo ku xiriirsan buundada oo hormari doonta Jaamacadda PSU ama dugsiga saree e Gambool.

Mahadsanidiin,

Wada Shaqayn Wacan,